

Wasaaradda Waxbarashada  
Xarunta M. W. Dadka Waaweyn

# Buugga Reerguuraaga. I

PJ  
2004  
P2  
BK9  
1724  
V.1

DAABACAADDA — KOOWAAD

LUULYO, 1974

ny

11.5.00

**T U S M A D A B U U G G A**  
**— Q a y b t a K o o w a a d —**

Casharka		Bogga
	Arar . . . . .	5
1aad	Maqaar, Caano iyo Hilib . . . . .	9
2aad	Xaas . . . . .	10
3aad	Timiro . . . . .	12
4aad	Biyo . . . . .	14
5aad	Hilib . . . . .	15
6aad	Maqaar . . . . .	17
7aad	Tiro iyo Tayo . . . . .	19
8aad	Geel . . . . .	20
9aad	Xeelad . . . . .	22
10aad	Caws . . . . .	23
11aad	Xooluhu . . . . .	24
12aad	Khadiijo . . . . .	26
13aad	Timir . . . . .	27
14aad	Bakhtiga . . . . .	28
15aad	Fandhaal . . . . .	29
16aad	Xarfaha . . . . .	31
17aad	Talo . . . . .	32
18aad	Sawirro iyo Xarfo . . . . .	33

— Qaybta Labaad —

Casharka		Bogga
19aad	Diin iyo Dawoco . . . . .	36
20aad	Dhufaanka . . . . .	37
21aad	Warsame iyo Warfaa' . . . . .	39
22aad	Sahal iyo Maxamad . . . . .	41
23aad	Jimcaale iyo Guuleed . . . . .	43
24aad	Saddex nin iyo Saddex Libaax . . . . .	45
25aad	Ninba kaskii buu kor tagaa . . . . .	47
26aad	Axmad iyo Miyiga . . . . .	48
27aad	Axmad iyo Kismaayo . . . . .	51
28aad	Quudinta . . . . .	53
29aad	Cuntada Jirka iyo Lafaha Dhista . . . . .	55
30aad	Habka Nuujinta Dhallaanka . . . . .	55
31aad	Ka-goynta Carruurta Naaska . . . . .	56
32aad	Nabaadguurka Dhulka . . . . .	57
33aad	Ka-hortagga Nabaadguurka . . . . .	59
34aad	Dixiriga Duuban . . . . .	60
35aad	Astaamaha lagu garto Dixiriga Duuban . . . . .	61
36aad.	Faafidda Dixiriga Duuban . . . . .	62
37aad	Faarax iyo Ka-hortagga Dixiriga . . . . .	63
38aad	Timiro iyo Ka-hortagga Dixiriga . . . . .	65
39aad	Doog . . . . .	68
40aad	Jeermiga Siduu ku Faafo . . . . .	70
41aad	Gabay . . . . .	72
42aad	Cabdi iyo Ka-hortagga Jeermiga . . . . .	73
43aad	Tallaalka . . . . .	74
44aad	Ilaali Caafimaadkaaga . . . . .	75
—	Tilmaamaha Baraha . . . . .	77
—	Tilmaamaha Raac . . . . .	78
—	Qoraalka . . . . .	79
—	Gabagabo . . . . .	80

## A R A R

Buuggan «Reer Guuraaga» waxa loogu tala galay inuu dadweynaha Soomaaliyeed ee Miyiga deggani ka barto qorista iyo akhriska Af Soomaaliga, kana faa'iideysto cilmiga ku jira.

Waa buug, sida aannu fileyno, qiimo iyo qaaya weynba u leh qof kasta oo Soomaali ah oo doonaya inuu wax ka barto Xannaanada Xoolaha, Dhirta iyo Daaqa, Nabaadguurka asbaabaha keena iyo siyaabaha looga hortago, Xannaanada Caruurta, Caafimaadka guriga, Murti iyo Gabay.

Habka waxbarista ee buuggani waa «Habka Erayada», taas oo macnaheedu yahay, erayo baa lagu bilaabay buugga si aan waaqti loogu lumin barashada Xarfaha oo qayaxan; waxaa kale oo la ogaadey in «Habka Erayada lagu gaari karo akhris degdeg ah. Haddii aad doonto inaad ogaatid habka loo doortay buuggan qoristiisa, waxaad akhrin kartaa «Tilmaamaha Baraha» ee buuggan xagga dambe kaga yaal.

Buuggani wuxuu ka koobmaa laba qaybood oo tiiba noqon lahayd buug gaar ah, hase yeeshee, hal buug oo keliya ayaa laga sameeyey si ay qaadistiisa iyo qaybintiisuba u sahlanaato Reer Guuraaga dhexdooda.

Qaybta hore ee buuggani waxay ka kooban tahay Erayo, Sawirro badan iyo weero gaagaaban oo akhriskoodu fudud yahay. Qaybta labaad waxay ka kooban tahay casharro gaagaaban oo murti iyo macna kaleba ka buuxa, cilmiina ku dhisan; waxa kale oo qaybata labaad ku jira Xisaab oo qeexan.

Waxa buuggan guud ahaan mahadiisa leh Wasaaradda Waxbarashada iyo Barbaarinta oo

amar ku bixisay qoristiisa, gaar ahaanna barayaa-  
sha ka shaqeyta Xarunta Maamulka Waxbarasha-  
da Dadka Waaweyn. Kuwaas oo ah Jaallayaal Xu-  
seen Cali Cabdulle, Yuusuf Axmed Sahal, H. P.  
Schiff iyo Maxamad Sh. Daahir oo casharrada  
qaarkood ku darsaday; Jaallayaal Muxsin Taabit  
iyo Maxamad Abuukar oo Sawiirrada Buugga ku  
yaal sawiray.

Waxaase mahad gaar ah iska leh oo uusan  
buuggani la'aantood qormeen Jaallayaal Maryan  
Weheliye Barre, Maxamed Axmad Jaumac, H. P.  
Schwoebel iyo Cabdulaadir Sh. Cabdullaahi oo  
casharradana wax ka soo qoray buuggana isku soo  
dubbaridey.

Xussen Cali Cabdulle,  
Maamulaha Xarunta Waxbarashada  
Dadka Waaweyn


*Qaybta*

*Kowaad*





# Casharka 1aad




maqaar



caano




hibil



biyo



caws



xannadano

Casharka 2aad

Cashar akhris ah




Xaas


Caano baynu cabnaa.

Hilib baynu cunnaa.

Maqaarka baynu ku dhaqanna.



*Xooluhu caws bay daaqaan.*



*Geelu biyo ayuu cabaa.*

*Akhris:*


*Maqaar, hilib, caano, geel,  
ri', sac, ido, lax, caws.*

Casharka 3aad  
Cashar akhris ah.



Timiro biyaha  
way karkarisaa.

Faarax xoolaha  
waa xanaaneeyaa.





Khadiija si  
digtoonaasha leh  
bay weelka  
cuntada u  
dhaqdaa.



Axmed riyaha buu ilaaliyaa.

Akhris:  
Iskaashato ma kufto.

# Casharka 4aad

biyo

b	i	y	o
---	---	---	---

Akhri oo qor:

<del>i</del>	b	biyo	
.o o	bi	iyo	biyo
y y	biy	yo	iyo
b b	biyo	o	

Akhris:

Saddex dadkaa kugu naca:

Barya badan; Baahi badan;

Bugtaan badaan.

# Casharka 5aad

hilib

h i l i b


Akhri oo qor:

l l l	hilib	h	hilib
h h h	hili	hi	iyo
l l l	hil	hil	biyo
h h h	hi	hili	il
l l l	h	hilib	


Yeeris:

il biyo hilib iyo l l h h

Cashar akhris ah.



Ratigu biyo buu ceelka ka  
soo jiidayaa.



Kanuna waa ceel.  
Yaa biyaha ka  
soo jiidaya?



# Casharka 6aad

maqaar

m	a	q	aa	r
---	---	---	----	---

Akhri oo qor:

m	maqaar		
ma	aqaar	raq	
maq	qaar	mar	
maqaa	aar	maraq	
maqaar	r	a	q

Yeeris:

maqaar, aar, raq, maraq,  
qaar, aqaar, hilib, iyo, biyo.

sac

s a c

Akhri oo qor:

s

s

s


c

c

c

Yeeris:

sac sal sar mas



Akhris:

Saddex waa ku hodaan:

hadh arooryo; hogol xagaa;

hillaac basari.

## Casharka 7aad

Cashar akhris ah.

Tirada xoolahaaga ha tixgelin  
ee tayadooda tixgeli.

Hilibka wanaagsani lacag  
dheeraad ah buu keenaa.

Lacagtaa waxaa loogu dhaqmi  
karaa: ceelal lagu qoto.

Meelo aad muddo dheer  
degganaan kartid kaalmo xagga  
dawada ah oo noloshiisa  
hagaajisa.

Ilmahaaga oo  
waxbarasho fiican  
hela, aqoonna yeesha.

Khadiija



Casharka baad

geel

g ee l

Akhri oo qor:

e	ee	g	Yeeris:
eg	eel		geel, ceel,
gel	geel	eeg	eg, gel.

Akhris:

Saddex la lama rafiiqo:

Nimaan run aqoon.

Nimaan rabi aqoon.

Nimaan rag aqoon.

ido

i d o

Akhri oo qor:

d

cid      dil      diir      diid

cad      dir      door      iid

cod      dad      deer      ciid

Yeeris:

ido, sid, door, diid, deer,


ciid, biyo, geel, hilib, sac,

eey, qas, sal, eeg, cod.


## Casharka 9aad

Akhris:

Qofka aad koob biyo ah siisaa,  
maalin ayey ku fillaan karaan.



Qofka aad dhiil biyo  
ah siisaana, saddex  
maalmood buu  
haysan karaa.



Qofkase aad tustaa  
sida ceel dheer loo  
qoto, biyo inta uu  
nool yahay ku  
filnaada buu helaa.

Casharka 10aad

caws

c	a	w	s
---	---	---	---

Akhri oo qor:

w w w w caws

war cawo

weel cawey

waraabe cawaale

wiil weed dawoco

Yeeris:

cawaale waa wiil.

waraabe iyo wan.

Akhriya oo ka falanqooda murtidan:

Saddex urur baa leh:

ciidan; caqli; calaf

Casharka 11aad

xooluhu

x	oo	l	u	h	u
---	----	---	---	---	---

Akhri oo qor:

x x x oo oo u u

xul maax g g g

xus axad w w w

xad yaxaas x x x

xacfad xaas u u u



# shakaal

sh a k aa l

Akhri oo qor:

sh sh sh

k k k

shar

kab

shabeel

koob

gaashaan

koor

Yeeris:

Geel iyo ido.


Waraabe iyo sac.

Diin iyo dawaco.



waraabe

sh Sh



# Casharka 12aad

## Khadiija

Kh a d ii j a

Akhri oo qor:

Kh kh j J

Khamiis Jimce

khad jiir

khadar jid

khoori wadajir jeer xaj

Yeeris:

Khamiis, khoori, xus,

xaafad, waraabe.



Khadiija

# Casharka 13aad

timir

t i m i r

Akhri oo qor:

tir                      tuur                      t    t    t


tar                      tuug                      xarunta

taabo                      taag                      bakhti

tawfiiq                      tag                      T    T    T

Timiro

Timiro



xannaano

# Casharka 14aad

Cashar akhris ah:



Neefka bakhtiga  
ahi si xun buu u  
uraa, cudurrana  
wuu keenaa.

Axmed neefkii  
bakhtiyey buu  
gubyaan.  
Ma taabanayo.



Jaamac neefka bakhtiga ah buu  
jiidayaa oo guryaha ka fogaynayaa:  
Xarigga uu ku jiidayana wuu ka  
soo tagayaa, mar labaabna  
kuma dhaqmi doono.

# Casharka 15aad

## fandhaal

f a n dh aa l

Akhri oo qor:

f f            n n            dh dh

af            faan            dhiil

Afgooye    haan            dhalo

fasal        naag            dhagax

if            nacnac        dhallaan

F F            N N            D D

Yeeris:

Haan iyo dhiil.

Naag iyo dhallaan.




fandhaal

# hamsa

Akhri oo qor:

la' da' gu' go' ri' la'aan  
su'aal lo' go'aan go'an



Afar waa lagu kalsoonaada:

ilaahaaga; diintaada;  
duunyadaada; dalkaaga.

## Casharka 16aad

Baro xafaha yaryar iyo kuwa  
waaweyn ee ay farta hooyo ka  
kooban tahay:

a	e	i	o	u
A	E	I	O	U

aa	ee	ii	oo	uu
Aa	Ee	Ii	Oo	Uu

b	t	j	x	kh	d	r	s
B	T	J	X	Kh	D	R	S

sh	dh	c	g	f	q	k	l
Sh	Dh	C	G	F	Q	K	L

m	n	w	h	y
M	N	W	H	Y

## Casharka 17aad

Akhriya oo ka falanqooda:

Shan nin oo isku tala ah  
shanshaa ka baxda. Shan  
nin oo kala tala ahna shan  
shanshaa ka baxda.

Layli:

Weerahan qor akhrina.

Waxa ariga laga helaa: caano  
la dhamo, hilib la cuno iyo  
subag wax walba lagu samaysto.

Gu' walba roob ayaq inoo  
da'a; xooluhuna daaq badan  
bay helaan.



## Casharka 18aad

Labada warqadood ee socda  
waxaad ku arki doontaa  
sawirro iyo xarfo.

Sheeg xidhiidhka ka dhexeeya  
xarfaha iyo sawirrada.

Qor magacyada sawirrada  
adigoo ku isticmaalaya xarfaha  
la socda.

B b



T t



J j



X x



Kh kh



D d



R r




S s




Sh sh



Dh dh



C c



G g



F f



Q q



















K k



L l



<p>M m</p> 	<p>N n</p> 	<p>W w</p> 	<p>H h</p> 
<p>Y y</p> 	<p>A a</p> 	<p>E e</p> 	<p>I i</p> 
<p>O o</p> 	<p>U u</p> 	<p>AA aa</p> 	<p>EE ee</p> 
<p>Ii</p> 	<p>OO oo</p> 	<p>UU uu</p> 	<p>,</p> 

## CASHARKA 19AAD

---

### A K H R I S

---

Booraan hadimo ha qodin ku dhici doontaan mooyiye.

Baribaa waxa jirey diin iyo dawoco inay Lo'wada lahaayeen. Dawacadii ayaa damacday inay diinka sirto, waxayna ku tidhi, «Waadiga harraadaye orod oo biyo raadso».

Diinka iyo dawacadu waxay dul taagnaayeen buur dheer guudkede. Diinkii ayaa buurtii ka soo dhaadhacay, biyo ayuu meel durdur ah ka soo cabbey, dabadeedna wuu soo laabtey.

Dawacadii ayaa intay dhagax weyn soo qaadey damacdey inay diinkii oo buurta soo koraya ku dhufato. Waxase dhacday in dawacadii ay culayskii dhagaxa celin kari weyday, dabadeedna ka soo daba dhacday oo ay halkii ku dhimatay. Sidaas buu diinkii ku badbaaday. Lo'diina ku dhaxlay.


### L a y l i :

Weydiimahan ka warceli:

1. Maxay diinka iyo dawacadu wada lahaayeen?
2. Maxay dawacadu damacday inay diinka ku samayso?
3. Xaggee bay diinka iyo dawacadu wada jooheen?
4. Yaa lo'dii dhaxlay?

## CASHARKA 20AAD

«Horu-dhufaan qoodheed dhaqasha horuu lee'yahay».



dibi aan dhufaannayn



dibi dhufaan

Waabaa waxa jiray laba nin oo lo' dhaqato ah. Labada nin waxaa la kala odhan jiray, Warmooge iyo Warsuge. Warmooge wuxuu lahaa laba dibi oo aan la dhufaanin. Warsugase wuxuu lahaa dibi sange ah oo uu yaraantii ku dhufaanay.

Maalin iyagoo ceel jooga ayuu Warmooge dibigii sangaha ahaa u bogey, wuxuuna yidhi «war maxaad dibigaaga siisay? Ma dhakhtar baad la doonatay oo waa dawo waxa ka muuqda?»


Warsuge, isagoo dhoosha ka qoslaya, ayuu yidhi «war caws iyo biyo ka badan maanan siin, ee yaraantii baan ku dhuufaanay» Warmooge isagoo farta dhexda ka qaniinsan, ayuu dibidii ku noqday, wuxuuna goostay inuu dibidiisa dhufaanto si ay sange ugu noqdaan, lacag badanna looga siisto marka uu iib geeyo.

## Yeeris:

Xaglo laaban xoolo kuma yimaadaan.

## XISAAB

Shaxanta barashadeeda 0 ilaa 10. Xusuus:  
Shaxan waxa loo yaqaan summadda ay tiradu leedahay.



U fiiro oo baro shaxanta adiga oo sawirka la xidhidhinaya. Qor shaxanta.

## CASHARKA 21AAD

---

Dibi hooyo xumi korme ma noqdo:



dibi ajaafa ah



Dibi qoodh ah.

Warsame wuxuu ahaa qawsaar. Lo'duu raaci jirey waxay u badnaayeen dibi ajaafa ah. Maalin maalmaha ka mid ah isagoo lo'da la jooga ayuu la kulmay warfaa oo lo' hidda fiican leh daajiinaaya. Warsame intuu quruxda lo'da Warfaa ka yaabay ayuu isweydiyey in lo'diisu sidaas oo kale u cayili doonto iyo in kale. Warsame ayaa Warfaa u yimid, wuxuuna weydiyey waxa lo'diisa quruxda ugu wacan. Warfaa baa yidhi, «Wanaaga iyo caafimaadka xooluhu waxay ku xidhan yihiin xannaanada iyo doorashada qoodha». «Taas waxaan uga jeedaa», waa inay saca iyo dibiguba yihiin kuwo farac wanagsan laga soo xuley.

# XISAAB


U fiirso oo ku hor qor sawirradan shaxanta ay ka kooban yihiin:

## Tilmaan raac



6


## Layili:





## CASHARKA 22AAD

Qaalin aan da'deeda gaadhin dibi lagulama degdego».



Sahal iyo Maxamed waa laba nin oo lo' dhaqato ah.

Iyagoon xoogaysan ayuu Sahal qaalmihiisa dibida ku daraa, waxayna dhalaan ilmo bukaan ah oo taag daran. Maxamedse wuxuu sugaa inta qaalmihiisu uga taaba qaadan, xoogna uga yeeshaan.




Markuu Sahal arkay in laga lo'fican yahay, ayuu u tagay Maxamed oo ku yidhi, «isku degmo ayaynu nahay, xoolaheenuna meel bay wada daaqaan, ee sidee bay ku dhacday inaad iga l'ofiicnaatid?».

Maxamed wuxuu ku jawaabay, «Qaalin aan da'deeda gaadhin dibi lagulama degdego».

## XISAAB

---

U fiirso oo baro tirada 0 ilaa 10 adiga oo xasuusanaya marka ay kordhayso iyo marka ay yaraa-nayso.



Tiraba tirada ay ku xigto hal bay ka yar tahay.

Tiraba tirada ay ku xigto hal bay dheer tahay.

— Summadda kala go-ynta

+ Summadda isuge-ynta.

= Summadda isla-ekaanshada.

## CASHARKA 23AAD


Boqol aan bah deeqin iyo toban beel deeqda.



Lo' jaabo ah

Waxa jirey laba nin oo lo'da aad u dhaqata waxaana la kala odhan jiray Jumcaale iyo Guuleed. Jumcaale lo'boqol ka badan buu lahaa, wuxuuna ka fakeri jiray uun tirada lo'diisa.

Guuleedse lo'aan saa u badnayn buu lahaa, hase yeeshee, muuqaal wanaagsan oo wuxuu ku dadaali jiray caafimaadkooda.



Lo' hiddo fiican

Maalin bay labadii nin isu faaneen. Jumcaalaa yidhi, «waan kaa lo' badanahay oo boqolka saray u dhaaftay». Intuu lo'dii Jumcaale aad u fiirshay, ayuu Guuleed yidhi, «aad iga lo' badnaatide immisaac' ka maashaa?».

«Dhibaatooyina aad kala kulantidse waxtar-kooda ma ka heshaa?».

Dabadeedna Jumcaalaa isagoo yaaban yidhi. «Co ma adigaa wax i dhaama?».

Guuleed isagoo isku kalsoon buu yidhi, «boqol aan bah deeqin, toban beel deeqdaan ka xigaa.

## XISAAB

Isugee oo baadi doon wadartooda:

Tilmaan raac:	1 biiro	
	+ 2 biiro	
	<hr style="width: 50px; margin: 0;"/>	<hr style="width: 50px; margin: 0;"/>
	3 wadar	

**L a y l i :**

$1+2=$	$2+4=$	$3+5=$
$6+3=$	$3+3=$	$2+7=$
$1+8=$	$2+6=$	$8+2=$

## CASHARKA 24AAD

---

### Saddex Nin iyo Saddex Libaax

---

Saddex nin ayaa beri socdaalay waxayna la kulmeen saddex Libaax. Nimanka mid waa fulay, kuna waa geesi, ka kalena waa codkar. Saddexda Libaax waxay ku tashadeen inay cunaan niman-kii, iyaguna waxay is-weydiiyeen siday uga badbaadi lahaayeen. Fulaygi baa yidhi, «aynu carar-no»! waxa la yidhi cararimayno. «Geesigii ayaa isna yidhi», «aan la dirirno». Markaas baa la yidhi». Maya way ina laynayaan. Ninkii codkarka ahaa baa saddexdii libaax ku yidhi, «Saddexdayadu mid waa caato, midna waa dhexdhexaad, aniguna waan ugu buuranahay ee ku heshiiya sidii aad noo qaybsan lahaydeen. Markaa ayey saddexdii bahal dirireen, kii ugu weynaa ayaa labadii kale dilay. Saddexdii nin halkii bay ku dileen libaaxi weynaa iyaguna ku nabad galeen. Soomaaliduna waxay tidhaa, «talo adigaa ku nool ee iyadu kuguma noola.

### XISAAB

---

Tirada hoos ku qoran hadhaagooda raadi;  
tilmaan raac:  $3 - 2 = 1$ .

**Layli:**

---

$4 - 3 =$	$3 - 3 =$	$6 - 1 =$	$4 - 1 =$
$7 - 2 =$	$4 - 2 =$	$5 - 2 =$	$6 - 5 =$
$9 - 7 =$	$8 - 5 =$	$6 - 4 =$	$2 - 2 =$

## Asal-Ma-Doorshe:

Ogsoonow in asal-ma-doorshaha isugeyntu yahay eber. Haddii tiro eber loo geeyo waxaad heshaa waa tiradii uun ee isma beddesho:

$$\begin{array}{l} \text{tilmaan sida: } 8+0=8 \\ \phantom{\text{tilmaan sida: }} 0+3=3 \end{array}$$

Xusuusnow haddii tiro kasta eber laga gooyo, waxa soo hadhaa waa tiradii uun ee isma beddesho.

$$\text{tilmaan sida: } 6-0=6 \quad 4-0=4$$

## CASHARKA 25AAD

---

### Ninba kaskii buu kortagaa:

---

Saddex nin baa beri wada socdaalay. Markay cabbar socdeen baa waxa ka hor yimid, nin awr baadi ah raadinayay wuxuna weydiiyey awr inay arkeen iyo in kale, markaas bay u sheegen inaysan arag.

Markay arrimi halkaa marayso baa nimankii midkood, inta u soo booday, yidhi, «War awrku ma il la'aa?» kii labaad baa isna yidhi «Awrku ma daba la'aa?» kii saddexaadna, awrka heeryo ma saarnayd? Suu-ye, «war tilmaamaha aad sheegteen oo idil wuu lahaaye, xaggee baad ku aragteen?» Ma anaan arag bay ugu warceliyeen. Halkii buu saddexdii nin ku qabsaday. Markaas bay is raaceen, waxayna u tageen in garsoore ah inuu u gar naqo.

Markuu waraystay siday ku ogaadeen astaamaha uu awrku lahaa ayaa kii ugu horeyey yidhi: «Dhinac kaliya ayuu geedka ka daaqay». «Kii labaadna» saala-diisu ma firidhsanayn ee meel bay wada tubnayd. Kii saddexaadna wuxu yidhi: «Raadkiisu hoos buu dhulka u disay.

Wuxuu garsoorihii caddeeyay inaysan saddexda nin awrka arag, ninkiina baadi doonkiisii buu halkii ka watay.

### XISAAB

---

Tirooyinkan hoos ku qoran wadartooda iyo hadhaagooda raadi.

Tilmaan raac:	8	5
	+1	-3
	<hr/>	<hr/>
	9	2

## Layli:

$4 + 2 =$

$6 - 5 =$

$4 + 0 =$

$3 - 2 =$

$7 - 4 =$

$3 + 5 =$

$9 - 6 =$

$5 - 0 =$

$0 + 8 =$

$8 - 4 =$

$5 + 5 =$

$7 - 7 =$

U fiirso oo qor tirada ay ka kooban yihiin sawirrada isku midka ah.



## CASHARKA 26AAD

Axmed iyo Miyiga

Samatar waa nin da'weyn. Wuxuu leeyahay afar carruur ah, laba wiil iyo laba gabdhood.

Axmed oo curadkiisi ah waa labaatan jir. Wuxuu rerku deggan yahay meel Afmadow Wooqooyi kala siman, aad buuna u ladan yahay oo xoolo badan buu leeyahay:

Maalin baa Axmed, isagoo geela la jooga, waxa u yimid wiil la yiraa Cali oo gashanaa dhar bilic fiican.



Cali waa reer Kismaayo, wuxuuna miyiga u yimid in uu ku nasto, iskuna qaras-falo. Way sheegkeysteen.



Cali wuxuu uga waramay dhismaha magaalada Kismaayo: nalalkeeda: shineemada, mussikada, jidadka, iwm.

Markuu Cali tagey, Axmed wuxuu is-yiri: «Kismaayo waa janno wax walba laga helayo». «Maxaa miyiga dhibka, baahida iyo oonka badan i dhigay?»

Habeenkii oo dhan buu fakarayey, wuxuuna go'aan ku gaaray inuu dhuunto oo Kismaayo aado.

### L a y l i :

Qor magacyada sawirrada aad hoos ku aragtid.



## XISAAB

### Huruqaadka isugentu leedahay:

**Xusuusnow:** Inay 8 iyo 4 tahay 12.

Haddaba inta rugta kowaad 2 lagu qoro, ayaa la qaataa halka kaaga soo baxay rugta kowaadka, kaddibna la dhigaa rugta tobnaadka, si ay u noqoto laba iyo toban.

### Tilmaan sida:

$$\begin{array}{r} 8+4= \\ = \\ \\ = \end{array} \quad \begin{array}{r} 8+2+2 \\ (8+2)+2 \text{ ama} \\ \\ 10+2 \\ 12 \end{array} \quad \begin{array}{r} 8 \\ +4 \\ \hline 12 \end{array}$$

### Layli:

$\begin{array}{r} 8 \\ +5 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 6 \\ +3 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 4 \\ +9 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 7 \\ +5 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 6 \\ +8 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 9 \\ +3 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 5 \\ +8 \\ \hline \end{array}$
$\begin{array}{r} 62 \\ +35 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 40 \\ +38 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 53 \\ +17 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 28 \\ +57 \\ \hline \end{array}$			
$\begin{array}{r} 49 \\ +48 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 39 \\ +50 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 14 \\ +15 \\ \hline \end{array}$	$\begin{array}{r} 35 \\ +18 \\ \hline \end{array}$			

## CASHARKA 27AAD

---

### Axmad iyo Kismaayo

---


Goor galab ah buu Axmed tagey Kismaayo, kadib markuu lix caanamaal safrayey. Guri uu adeerki leeyahay buu habeenkaa u hoydey. Adeerku aad buu uga carooday imaatinkiisa, wuxuuna u sheegay inuu aroorti ku laabto xoolihii.

Axmed Kismaayuu iska joogey. Afar bilood ayuu silic iyo saxariir ku noolaa. Gidaarrada buu habeenkii seexan jirey, wax dhar ahna labadii qayd ee uu miyiga kala yimid buu ka qaybey. Wuxuu cunana ma haysan. Masaajidka ayuu mar mar canbuulo ka heli jirey. Waxaa intaa u dheeraa, isagoo xumadi haysey muddo shan iyo toban maalmood ah.



Adeerkii baa arkay isagoo gidaar hurdaya. Dulliga ka muuqda markuu arkay bay calooshu gubatay. Wuu kexeeyey, makhaayad buuna geeyey oo cunto ka siiyey, subaxnimadiina baabuur buu saaray.

Axmad markuu tagey aqalkoodii ee uu arkay aabihi iyo walaalihii oo ka nexeen dulliga haystey ayuu iska ooyay, wuxuuna dhaar ku maray inaan magaala dambe magaceeda laga maqli doonin. Aabihi oo madaxa u salaaxay wuxuu yidhi: «Waxaad khayr moodid oo khasaaro kuu ah baa jira».



**Amaahida kala goyntu leedahay:**

kala goo 25 — 8

Ogsoonow 5 inayan ka go'i karin 8. Markaa intaad rugta tobanaadka hal ka soo qaado oo ah 10 u gee 5 tii, dabadeedna ka goo 8. ( $15 - 8 = 7$ ). Waxaa kuugu hadhay rugta tobanka 10 qudh ah. Markaa waxa kuu soo hadhay waa  $10 + 7 = 17$ .

Tilmaan:

$$\begin{array}{r}
 25 = 20 + 5 = 10 + 15 \\
 - 8 \text{ ama} \quad = \quad 8 \\
 \hline
 17 \qquad \qquad = 10 + 7
 \end{array}$$

**Tilmaanta kore adiga oo raacaya haraaga raadi:**

9	12	15	18	20
— 5	— 6	— 8	— 9	— 10
—	—	—	—	—
31	24	19	88	70
— 10	— 6	— 12	— 77	— 66
—	—	—	—	—

## CASHARKA 28AAD

### Quudinta



Qofku haddii uusan he-  
lin cunto ku filan oo nu-  
xur leh, ma noqdo qof  
caafimaad qaba, dhaq-  
sana wuu u maclulaa,  
dabadeedna u jirradaa.

Qofku haddii uu cuno  
cunto kala jaad ah, nu-  
xurna leh caafimaadkii-  
su wuu wacnaadaa, jir-  
kiisuna wuu dhismaa.


### Yeeris:



Miro badan cun, caafimaadkaagu ha fiicnaadee.

## CASHARKA 29AAD

Cuntada jirka iyo lafaha dhista:  
hibibka, kallyuunka, ukunta, caanaha, digirta iyo law-  
ska.




Cuntada dhaqdhaqaaqa iyo kulaylka jirku u baa-  
han yahay siisa waxa laga helaa: dufan oo dhan, harur-  
ka, galleyda, bariiska, sareenka, baastada, burka, son-  
kerta iyo malabka.



**XISAAB**

20	33	15	10	14
+ 7	- 16	- 8	+ 6	- 9
-----	-----	-----	-----	-----

Cuntada cudurra da jirka ka ilaalisa, waxa laga he-  
laa: caanaha, beerka, kalluunka, ukunta, yaanyada, bo-  
corka, canabka, mafafaayga, liinta, muuska, seytuunka  
iyo cambaha. Qof kasta waa inuu aqoon fiican u yee-  
shaa cuntada nuxurka leh.



**Layli:**

Qor oo sawir:  
Shan cunto oo aad buuggan ka baratay, hadda ka horna  
aanad cunin.



## CASHARKA 30AAD

### Habka Nuujinta dhallaanka

Markay ilmuhu dhashsan oo ifka yimaadaan, 24ka saac ee hore, wax dheef ah lama siiyo. Hurdo iyo nasiino badan bay u baahan yihiin.

Maalinta labaad ayaa lagu bilaabaa nuujiska. Saddex daqiiqo ayaa la nuujiyaa 3 ama 4 saacadood walba.

Nuujinta waa la kordhiyaa: Hooyadu waxay muujin karta toban daqiiqo naas walba todobaadka hore.

Hooyadu waa inay naadiifisaa naaska inta aysan nuujin horteed.

Culayska carruurta haddii uu ka yar yahay ama la'eg yahay toddoba rodol, waa in la nuujiyaa saddex saacadoodba mar. Haddiise culaysku ka badan yahay toddoba rodol waa in la nuujiyaa afartii saacha mar.



Mar kasta oo ilmuhu naaska nuugo, hooyada waxa waajib ku ah inay si toosan u qaado, iyadoo mada-xiisa garabkeeda la simaysa, si naxariis lehna dhabarka uga qabanaysa si ay neeftu uga soo baxdo.

## Yeeris:

Jimce  
Arbaca

Sabti  
Khamiis.

Axad

Isniin

Talaado

## CASHARKA 31AAD

### Ka gooyinta carruurta naaska.



Ka gooyinta carruurta naasku waxay ku xiran tahay hadba sida uu ilmuhu ka noqdo xagga caafimaadka, hawada iyo caafimaadka hooyada. Haddii uu canuggu jirran yahay, waa waajib in loo dheereeryo muddada la nuujinayo. Bilaha kulaylka waa inaan laga gooynin nuujiska. Waxa la deddejiyaa ka-gooyinta naaska. haddii ay hooyadu jirran tahay ama uur leedahay.



Tartiib-tartiib baa habboon in naaska ka-gooyintiisa lagu bilaabo. Canugga caadiga ah, bisha afaraad baa lagu bilaabaa siinta cuntada nacfiga leh ee gu habboon: liin macaan biyaheed, yaanyo dhacaankeed, fuud khafiif ah, miishaali masaggo, digir, galley lagu darayo in yar oo saliid ah iyo sonkor.



### Layli:



Qor magacyada maalmaha toddo-baadka, adigoo mid walba horteeda ku qoraya cunta kala jaadka ah eed ilmahaaga ugu tala gashay.






### Nabaadguurka Dhulka



Waa dhul barwaaqaysan oo leh geedo dhaadheer iyo daaq badan, maxaa yeelay, nabaadguur buusan arag.




Nabaadguurku wuxuu badanaaba dhacaa xilliga jiillalka oo aysan dhir daaq iyo geedo jirin. Kuwaa oo dad iyo duunyaba noloshooda ugu dhibaatoodaan.

**Cadawiyada ugu waaweyn ee nabaadguurka dhulka keena waa:**

1. **Qoraxdu** Markay aad u kulushahay waxay gubtaa carrada, geedaha iyo daaqa oo idil.
2. Dabeysaha badani dhibaatooyin ayey keentaa:
  - a) Carradii dheefta lahayd oo ay qoraxdu qalla-jisay bay qaadaa.

- b) Waxay jajabisaa, daba-deedna fogaysaa geedaha, cawska, waxa la beerto iwm.
3. Waxaynu ognahay inay biyuhu waxtar weyn u leeyihiin nolosha dadka, xoolaha, dhirta iyo daaqa.  
Hase yeeshe, mararka qaarkood (hadday bataan iyo hadday yaraadaanba) dhibaato badan bay leeyihiin.
- a) Markay biyuhu bataan, daadku:
1. Geedaha dhirta iyo daaqa ayuu xididda-siibaa dabadeedna carradii hadhay ee dhefta lahayd buu qaadaa oo fogeeyaa.
  2. Neecawda buu beeraha ka xiraa.
- b) Markay biyuhu yaraadaanna: Nololi ma jirto, maxaa yeelay, geedo, dhir, daaq iyo beeruhu ma baxaan; dadka iyo duunyadana dhibaato ayaa halkaa ka soo gaadha.
4. Xooluhu markay daaqa ku talax-tagaan ayey gacan weyn ka gaystaan xagga nabaadguurka, siiba markay meel fadhi kaliya intii mudda ah daqaan oo ay xididdada u siibaan, ciidana budliyaan.
5. Dadku waxay gooyaan geedo aan mar labaad dib u soo baxayn, dhirta iyo daaqaba. Waxay guubaan geeda dhaadheer si ay dhuxul uga sameeyaan.  
Dhibaatooyinka aan kor ku soo sheegnay oo idili waa kuwa dhaliya nabaadguurka. Dalkii namaadguurku ku bataan, wuxuu isu beddelaa meel lama-degaan ah oo aanay nololi jirin.



## **CASHARKA 33AAD**

---

### **Ka-hortagga Nabaadguurka**

Kaddib markaynu ogaanay in nabaadguurku dhibaatooyin waaweyn leyahay, ayaa waxaa haboon inaynu qaadno tallaabooyin degdeg ah oo aynu kaga hortagno:

1. Waa inaynan xoolaha bed qur ah la daaqsiinin ee fadhiyaal kalaa duwan intii mudda ah ba la geeyaa.

#### **Ujeeddada Fadhiyaalka laga leeyahay waxay tahay:**


- a) Inaysan xooluhu ku talaxtegin xididda-siibka dhirta iyo daaqa.
  - b) Si ay suuragal u noqoto inay xooluhu jiilaalka daaq ku filan helaan.
  - t) Ka-hortagga nabaadguurka bay gacan ka gaysan karaan.
2. Waa inaan dhirta iyo daaqa la gooyn lana gubin.

Wasaaradda xannaanada xoolaha, dhirta iyo daaqa waxay gargaar ka kaysataa sidii loo ilaalin lahaa nolosha xoolaha, kaymana loo samayn lahaa si uusan dhulku u nabaadguurin.

## CASHARKA 34AAD

### Dixiriga duuban (Round worm)

Dixiriga duubani waxyaaba nolosha dadka halis u ah buu keenaa, aad buuna u dheer yahay oo qof weeyn cagti buu la'eg yahay. Sidaa awgeed, ayaa si dhib yari ah loogu arki karaa isha oo qaawan iyadoon la isticmaalin qalabka wax weyneeya.



Dixiriga duubana wuxuu galaa mindhicirka dadka, wuxuuna dhuuqaa oo uu ku nool yahay cuntada nuxurka leh ee qofku cuno. Waxaynu ogsoonahay inay hooyo kasta cunta wanaagsan oo nuxur leh gurigeeda ugu talagasho, hase yeeshee, haddii uu dixiriga duubani kugu jiro, waxa hubaal ah inuu dhuuqayo nuxurka cuntadaas. Dixiriga duuban ee kugu dhex nool baa nafaqadii ay cuntadu ku gelin lahayd kaa nuuga.

## CASHARKA 35 AAD

Astaamaha lagu garto inuu dixiriga duubani jirkaaga ku jiro waxa weeye:

- a) Qufac aad u badan;
- b) Caloosha oo ku xanuunta;
- t) Shuban isdaba joog ah;
- j) Dhismaha jirka oo isdhima.

### Yeeris:

Dixiriga duubani aad buu u weyn yahay oo qof bini aadan ah cagti buu la dherer yahay.

Dixiriga duubani nafaqada ku jirta cuntada aynu cunno buu dhuuqaa, nuxurkana kala baxaa.

### Sida uu dixiriga duubani u tarmo (fido)

Dixiriga duuban ee dheddigga ah ayaa qofka mindhicirkiisa ku dhasha ukun aad u tiro badan oo yaryar markiiba. Ukunta inteeda badani waxay soo raacdaa qofka saxaradiisa.



## CASHARKA 36AAD

---

### Faafidda Dixiriga Duuban

---

Dabeysha iyo roobka ayaa qaada oo fageeya, wa-  
xayna ku shubaan ceclasha iyo webiyada aynu ka cab-  
no, kuwaas oo u suura geliya inay mar-labaad jirkeen-  
na ku soo laabtaan.



Sidaas bay ku tarmaan  
oo jirkeena ugu faalaan,  
dabadeedna innaga nuugaanna  
nafqada oo idil.

**Yeeris:**

---

### Dhallaanka iyo Dixiriga

---

Dhallaanka jirkooda Dixiriga duubani ku jira, wa-  
xaa badanaaba cuncunta dabada; farta ayeyna la'aad-  
aan! Waxaa dhici karta inay fartii oo xaar leh sanko  
la'aadaan oo ay uriyaan. Sidaas ayuuna mar-labaad di-  
xirigii jirka ugu soo laabtaa.

**Layli:**

---

**Weydiimahan qoraal kaga warceli:**

---

1. Muxuu yahay dixiriga duubani, intee buuna dhe-  
rer la'eg yahay?



2. Naggee buu dixiriga duubani jirka dadka kaga jiraa, muxuuse ku nool yahay?
3. Sheeg tilmaamaha lagu garto inuu dixiriga duubani qofka jirkiisa ku jiro?
4. Sidee buu dixiriga duubani u faafaa, sideebaase la isaga celin karaa?

## CASHARKA 57AAD

### Faarax wuxuu yaqaan ka-hortagga dixiriga

Faarax wuxuu garanayaa inay ukunta dixiriga duubani soo raacdo qofka saxaradiisa, dixiriguna sidaa ku faafo.

Waa nin waxgarad ah, wuxuuna sheegaa inaysan wanaagsanayn in meel kasta lagu saxaradoodo, ee ay habbon tahay inuu qoys waliba leeyahay musqul u gaar ah.

Agagaarka guryaha waa inaysan caruurtu ku saxaroon ee waa in looga qodaa godod yaryar meel guriga u dhow, una jirta dhowr boqol oo mitir.



Musqul caruured



Musqul dadka waaweyn

Looma baahana inay musqushu ka samaysan tahay wax qurux badan ee danta laga leeyahay, waa in saxarada lagu asturo meel god ah, si aysan ukuntu u faafin.

## Layli:

### Weydiimahan ka warceli:

- 1) Sheeg waxa musqulaha loo samaysto.
- 2) Sidee musqulaha loo samaystaa?
- 3) Xaggee ku habbon inay caruurta ku saxarooto?

## XISAAB

Barashada Rugta qiimaheeda:

**Ogsonow:** Rug waxa weeye khaanadda tusta sida tirada tirsiimadeedu u kala baxdo.

### Rugta kowaad iyo rugta tobnaad:

Rugta kowaad waxay ka kooban tahay hal **shaxan** ama tirada 0 ilaa 9. Rugta tobnaad waxay ka kooban tahay **labo shaxan** ama tirada 10 ilaa 99.

Tilmaan raac: 46

U fiirso tiradasi waxa weeye Afarta iyo lix waxayna la macna tahay:

rugta kowaad, 6 meelood oo kow kow ah,  
rugta tobanaad, 4 meelood oo toban toban ah.

4	6
rugta tobnaad	rugta kowaad
4	6



### Timiro iyo ka-hortagga dixiriga.


Timiro waa haweynay gaari ah oo ku dadaasha nadaafadda guud ee gurigeeda iyo tan jirkeedaba.

Waxay ogtahay inuu dixiriga marka hore jirkeenna ka soo galo afka iyo meelaha kale ee dulduleela, dabadeedna u gudbo mindhicirka.

Timiro waxay had iyo jeer ku dadaashaa inay biyaha karkariso intaan la cabin horteed, maxaa yeelay, karkarintu waxay dishaa luullunta iyo ukunta dixiriga ee biyaha ku jira.

Waxa kale oo ay timiro ku dadaashaa inay biyo diiran ku dhaaqdo cagaarka (khudradda) sida; bataatada, yaanyada, caleenta cagaaran, karootada, bocorka, canabka iwm.

Timiro si hagaagsan bay cuntada u diyaarisaa, gaar ahaan hilibka oo ay ogsoon tahay inay ukunta dixirigu ku badan tahay:



Waxaa habboon inaynu ku dadaalno nadaafadda guud ee jirkeenna, kuna meyrno gacmaheenna biyo iyo

saabuun kaddib markaynu saxaroonno iyo cuntada horteedba.

Waa in sidoo kale lagu dadaalaa caafimaadka carruurta, lagana ilaaliyaa jirkooda ukunta dixiriga duuban. Waa in had iyo jeer loo dhaqaa gacmaha marka wax la siinayo horteed iyo kaddib markay wax cunaan.

### L a y l i :

1. Maxay Timiro ku dadaasha?
2. Dixiriga duubani xaggee buu jirkeenna ka soo galaa? Xaggeese uga gudbaa?.
3. Maxaa Carruurta gacmaha loogu dhaqaa?
4. Maxay Timiro khudradda ku sameysaa?
5. Maxay Timiro gaar ahaan nadaafadda hilibka ugu dadaashaa?



Ka dooda ujeeddada ay maahmqhdani leedahay.  
«Arrad waa dan, Usgagna waa dulli».

Tirooyinkan rugta kowaad iyo rugta tobnaad u kala saar.

Tilmaantana raac:

56 waxa weeyaan 5 tobnaad iyo 6 kowaad.

## Layli:

42 waxa weeyaan \_\_\_\_\_ tobnaad iyo \_\_\_\_\_ kowaad

73 waxa weeyaan \_\_\_\_\_ tobnaad iyo \_\_\_\_\_ kowaad

84 waxa weeyaan \_\_\_\_\_ tobnaad iyo \_\_\_\_\_ kowaad

15 waxa weeyaan \_\_\_\_\_ tobnaad iyo \_\_\_\_\_ kowaad

Tirooyinkan rugta u kala baxsan, maxay le'eg tahay?

**Tilmaan:** 6 tobnaad iyo 2 kowaad = 62.

## Layli:

5 tobnaad iyo 1 kowaad = \_\_\_\_\_

2 tobnaad iyo 4 kowaad = \_\_\_\_\_

9 tobnaad iyo 2 kowaad = \_\_\_\_\_

3 tobnaad iyo 7 kowaad = \_\_\_\_\_

4 tobnaad iyo 6 kowaad = \_\_\_\_\_

## CASHARKA 39AAD

---

### DOOG

---

Waxaa jira cayayaan ka duwan dixiriga duuban. Waa cayayaan aad u yaryar oo aan ishoo qaawan lagu arki karin, qalabka wax weyneeya oo lagu isticmaalo mooyee. Waxay dadka iyo duunyadaba u keenaan cudurro waaweyn oo noloshooda halis gelin kara.

#### Cudurradaas waxa ka mid ah:

Dabakaruubka, Qaaxada (T.B.) teetanaha, iyo kuwa kaloo badan.

Waxay ku magac dheer yihiin «Jeermis».



## XISAAB

U fiirso o baro rugaha cusub-  
tilmaan: 7654

rugta kunaad	rugta boqollaad	rugta tobnaad	rugta kowaad
7	6	5	4

Ogsoonow in tiradaasi tahay, toddoba kun, lix boqol, konton iyo afar.

Waxayna la mid tahay:

rugta kowaad, 4 meelood oo kow kow ah;

rugta tobnaad, 5 meelood oo toban toban ah;

rugta boqollaad, 6 meelood oo boqol boqol ah;

rugta kunaad, 7 meelood oo kun kun ah.

### Layli:

Adiga oo tilmaanta raacaya tirooyinkan rugtooda ku kala qor:

1674 waxa weeye 1 kunaad, 6 boqollaad, 7 tobnaad iyo 4 kowaad.

2589 waxa weeye ——— kunaad ——— boqollaad, ———  
tobnaad iyo ——— kowaad.

3067 waxa weeye ——— kunaad, ——— boqollaad, ———  
tobnaad iyo kowaad.

8491 waxa weeye ——— kunaad, ——— boqollaad, ———  
tobnaad iyo kowaad.

5203 waxa weeye ——— kunaad, ——— boqollaad, ———  
tobnaad iyo kowaad.

## **CASHARKA 40AAD**

---

### **Jeermigu Siduu ku faafo:**

Jeermiga si sahlan ayaa loo kala qaadaa, waxaana laga dhex helaa oo uu ku nool yahay qofka jirran, xoolaha iyo meelaha wasakhda leh.

### **Sida loo qaado:**

1. Qof jirran oo aad taabatid, wax la cuntid ama kugu neefsada.
2. Boog aan la dawayn.
3. Dhilmaanyada, dhiqlaha, shilinta iyo cayayaanka yaryar ee dadka iyo duunyadaba ku kor nool.

### **L a y l i :**

1. Qor siyaabaha Jeermigu jirka dadka iyo xoolaha u galo.
2. Sheeg magacyada cudurrada Jeermiga laga qaado.

## **XISAAB**

Xusuusnow in horuqaadka isugeynta uu yahay si-dii hadda ka hor aad soo aragtay.

**L a y l i :**

**Isugee tirooyinka hoos ku qoran adiga oo raacaya tilmaanta lagu siiyey.**

48	50	876	5000	4101
9	10	92	4876	987
82	80	115	3489	3876
+ 17	+ 5	+ 304	+2003	+6215
<hr/>	<hr/>	<hr/>	<hr/>	<hr/>
156				

Waxaad ogsoonataa in soo amaahadka kala goyntu uu yahay sidii aad horey u soo aragtay.

**L a y l i :**

**Tirooyinkan haraagooda raadi adiga oo tilmaanta lagu siiyey raacaya.**

96	48	284	467	8092	6354
-67	-24	-74	- 208	-4357	-4126
<hr/>	<hr/>	<hr/>	<hr/>	<hr/>	<hr/>
29					

**Yeeris Murti ah.**

Saddex dadkaa kugu naca:

1. Barya badan.
2. Baahi badan.
3. Buktaan badan.

## CASHARKA 41AAD

Tixdaan gabayga ah waxaa tiriyeey:  
**Axmad Cabdullaahi Qaalib**

Geela iyo fardaha iyo lo'diyo	gaabanow ariga
Gargaaraha dameer iyo buquul	gurada loo buuxsho
Giddigoodba xooluhu naftey	raaxo geliyaane
Haddaan Eebahay nagu galladin	libin ma gaarreene
Gasiinkaad cuntaba xoolahaa	meel ka soo galae
Gacanteenna midig weeye	iyo gumartideenniye
Gabdho iyo rag hawsha u guntada	yey gabaabsiyine
Jiilaal garwaaxsadey abaar	galuhu duulaayo
Ninkii geel lahaa wuxu dhamaa	Caanihii goraye
Gorof iyo sibraar buu sitaa	garabka saaraaye
Ganuun buu carruurta u shubaa	gooru doonoba e
Giblo iyo cayaar bey kolkaas	gegi buteystaane.
Gendi iyo gafane kaa cuniyo	shilin gabaarreya
Haddaan qodaxda laga goyn	xanuun gaar ah baa heliye
Gu' hagaagey geeslaha dhashoo	roob ku gobo' leeyey
Garoorka iyo caanaha batee	guriga yaalyaala
Gaarida lushaa haanta waa	gacal ammaantaaye
Gasiinkaad cuntaba xoolahaa	meel ka soo gala e
Gacanteenna midig weeye	iyo gumartideenniye
Gabdho iyo rag hawsha u guntada	yey gabaabsiyine
Haddii ay marti soo gab tiri	goor dadkuba seexday
Wanan baa bir lagu gawracaa	gaari karisaaye
Haddaan Eebahay nagu galladin	Libin ma gaarreene
Gasiinkaad cuntaba xoolahaa	meel ka soo gala e
Gacanteenna midig weeye	iyo gumartideenniye
Gabdho iyo rag hawsha u guntada	yey gabaabsiyine




## CASHARKA 42AAD

### Cabdi iyo ka hortagga Jeermiga:

Cabdi waa nin xoolaha aad u jecel, kuna dadaala caafimaadkooda. Maalin ayuu u yimid Cali oo ah kaaliye Takhtareed, wuxuuna weydiyay sida uu xoolihiisa jeermiga uga ilaashan lahaa.

### Cali wuxuu ku yiri:

- a) Neefka jirrani waa inuusan caws la daaqin, biyaha la cabin xoolaha kale ee laga fogeeyaa.
- b) Boogta dadka iyo duunyadaba ku dhacda waa in biyo karkarsan lagu dhaqo, si dhaqsa ahna loo da-weeyo.
- t) Xoolaha dhintay waa inaan la taaban oo la fogeeyo ama la aaso. Intaba waxaa ka fiican in la gubo.
- j) Xoolaha oo la tallaalo.



## XISAAB

### Weydimaha ka warceli:

1. Cabdi wuxuu lahaa 126 geel ah. Markaa ayey walaashi siisey 34. Walaakiina uu ugu daray 58. Haddaba Cabdi immisa geel ah buu leeyahay?
2. Maxamed wuxuu lahaa 124 sac. Markaa ayuu Warshadda hilibka ka iibiyey 16 sac. Haddaba Maxamed immisa sac ayaa u hadhay?
3. Saddex nin ayaa iskaashato xoolaley ah sameystay. Markaas mid wuxu keenay 18, midna 9, kii kalana 27. Saddexda nin immisa neef ayey wadajir u leeyihiin?
4. Nin beeraley ah, ayaa doonay inuu iibsado cagaf cagaf qiimaheedu yahay 6785 shilin; haddaba haddii ninkaasi uu haystay lacag dhan 4290 shilin. Immisa lacaga baa ka dhimman?

## CASHARKA 43AAD

### Tallalka:

Tallaalka wax weyn ayuu u taraa nolosha dadka iyo duunyadaba, oo jeermiguu ka hortagaa intuusan jirka soo gelin.



1. Waxaa la ogyahay in cudurku yahay ciidan jirkeenna soo weeraraya, dawada la isku tallaalana tahay ciidan aynu ka horgaynayno; haddiise ay dhacdo inuu cudurku jirka tallaalka kaga hormaro, dawadu waxtar ma yeelato.

Sidaas awgeed, waxa habbon in xoolaha la tallaalo intayan jirran ka hor.

2. Waxa kale oo aynu ognahay in cudurrada xooluhu qaadaan badan yihiin, sidaas awgeed, waxaa habbon in xoolaha dawooyin kala geddisan lagu tallalo.
3. Waa in neefka la tallaalaba summad gar ah lagu dhi-go, si aysan u dhicin inaan mar kale isla dawadii lagu tallaalin.

### **L a y l i :**

1. Sheeg waxa xoolaha caafimaadka qaba loo tallaalo.
2. Maxaa neefka la tallaalo summadda gar ah loogu yeelaa?
3. Maxaa xoolaha dawooyin kala geddisan loogu tallaalaa?

### **CASHARKA 44AAD**



Kani waa Axmad. Aad ayuu u harradsan yahay. Wuxuu cabbayaa biyo aan wanaagsanayn. Biyuhu waxay leeyihiin lulumo iyo bahallo kale oo yaryar.



Waa habeen. Axmed aqalkiisii ayuu tagay. Darin duleedka tiil buu ku seexday. Wuu jirran yahay. Biyihii aan wanaagsanayn ee uu cabbay ayaa caloosha ka qabtay.



Isbitaalka ayaa Axmad la geeyay. Takhtar baa u yimid oo ku yiri: «Xaggee laga hayaa?» «Caloosha» ayuu ku warceliyay Axmed. Takhtarkii baa yiri. «Ma xaad cabtay?» Biyo wabi oo nadiif ah ayaan cabbay», buu ku jawaabay Axmad.

«Miyaanad ogayn in biyaha webiyada iyo kuwa ceelasha laga qaado cudurro in kasta oy noola eg yihiin wax nadiif ah», buu Takhtarki ku yiri Axmad. Wuxuu intaa ku daray in cudurrada laga qaado ay ka mid yihiin shubanka, matagga, daacuunka, xundhurta iwm.

Axmad, isagoo yaaban ayuu yiri:  
«Maxaan sameeyaa si aan uga badbaado cudur-  
radaa?»

Waxa habbon inaad karkarisid biyaha intaadan  
cabbin horteed.

## **TILMAAMAHA BARAHA**

Buuggan waxa loogu tala galay in reer guuraagu  
wax ka barto, wuxuuna ka kooban yahay: wax akhris,  
wax qoris iyo xisaab.

Waa markii ugu horreysay ee buug caynkan oo ka-  
le ah reer guuraaga loogu tala galo, waxaana lagu han-  
weynayahay inuu kaalintiisa ka soo baxo.

Laba hab ayaa ugu waaweyn, haddii la eego taa-  
riikhda waxbarashada: **HABKA XARFAHA** (b, t, j, x, ....) iyo **HABKA ERAYADA** (Caano, hilib ...).

Dadka buuggan isku soo dubbariday waxay ka  
kaaftoomeen habka xarfaha, waxayna door bideen hab-  
ka ereyada oo ah kan cusub, fududna.

Baraha waxa laga codsanayaa inuu buugga wada  
akhriyo intuusan waxbarista bilaawin, barayaasha ka-  
lena kala sheekaysto, si uu u raaco habka buugga loo  
qoray, hawshuna u fududaato.

Waxa la xasuusinayaa baraha aan habka waxba-  
rashada tababar fiican u lahayn inuusan ka argagixin  
«Habka Ereyada»; waayo, waxa loogu tala galay til-  
maamooyin uu raacayo oo u fududeeya waxbarista  
buuggan. Wuxuu habkani ardayda ka fogeeynayaa ina-  
ysan dusha wax uun ka qaybin ee waxay marka hore  
baranayaan sida ereyada uun loogu dhawaaqo iyaga oon  
waxba qorin.

## TIMAAMAHA RAAC.

- b) Bogagga hore ee buuggan waxaad ka arki doontaa sawirro ay ardaydu si hawl yar ku gartaan, erayana (magacyada sawirrada) la socdaan.

Tus ardayda sawirrada adigoo ku dhiiri kalinaya inay erayada ku dhawaaqaan. Sidaa ku wad waxbarista: sawirro cusub, erayo cusubina la socdaan.

Waxa dhici karta in ardaydu sawirrada qaarkood aysan garan ama ay ku adag yihiin; waxa baral a markaa u bannaan inuu isaga naftiisu u sheego.

- t) Baraha ayaa mar labaad erayada si wanaagsan oo baayaan ah ugu dhawaaqa iyadoo ardaydiina ka daba oranayso.

Looma baahna in ardaydu wax qorista haddiiba bartaan. Waxa ku filan oo kaliya inay erayada uun ku dhawaaqi karaan.

- j) Waa in ardayda la siiyaa fursad ay layli badan ku sameeyaan, sawirraduna ay ugu abuuraan jacayl xagga wax akhriska iyo si arday waliba kartidiisa lagu ogaado. Waxa kale oo ardayda la siiyaa fursad ay sawirrada uga wada sheekaystaan, waayo aragnimadoodana isku dhaafsadaan, kagana doodaan xiriirka u dhexeeya sawirrada badan ee kala geddisan oy buugga ku arki doonaan.



## QORAALKA

- Casharka 4aad, ayuu qoraalku ka bilaabanayaa.
1. Baraha ayaa erayga «biyo» ee buugga ku yaal sabuuradda ku qora-si aad u fasiix ah ayuuna ugu dhawaaqaa, iyagoo ardayduna ka daba oranayso. Marka hore waxa fiican inaad xariiqimaha buugga ku yaal oo kale sabuuradda ugu samaysid, si ay ardaydu kuu raad raacdo, una fahmaan faa'iidada ay xariiqimuhu leeyihiin. Ul toosan ama mastarad baad xariiqimaha ku samayn kartaa.
  2. Erayga oo la higgsaadiyo, xarfaha uu ka kooban yahay oo la kala qeexo oo mid mid loo akhriyo loona barto.
  3. Erayga iyo xarfuhuu ka kooban yahay oo la qoro. Baruhu waa inuu ardayda tusaa habka wanaagsan ee qalinka loo qabsado iyo sida wax loo qoro. Baruhu waa inuu ku dhex wareegaa fasalka si uu wax ula qabto kii liita.
  4. Waa in baruhu fursad u siiyaa ardayda inay layli badan xarfaha ay soo barten ku sameeyaan, iyagoo ka abuuraya ereyo cusub. Si aysan ardaydu qoraalka uga xiisa dhicin, waxaa loogu tala galay sheekooyin gaagaaban, maahmaahyo iyo murti ay akhriyaan.
  5. Casharba casharkuu ka dambeeyo ayuu ka weynaanayaa. Marka waxa la rabaa inuusan baruhu casharada dhaadheer sida kuwa yaryar saacad kaliya ugu bogin, ee waa inuu qaybba saacad u gooyaa.
  6. Waa inaan waxbarista la dedejin ee si tartiib ah loo wado, maxa yeelay, buugaba waxaa loogu tala galay in hal sano la barto. Sidaa daraadeed, waa inuu baruhu ku celceliyaa casharkiiba dhawr jeer si uu fasalka oo dhami u garto. Haddiise ay dhacdo in fasalku fahma badan yahay, waxaa habboon in horey loo wado, si aysan waxbarashada uga xiisa jabin.

## GABAGABO

---

Dnta buuggan laga leeyahay kuma koobna in wax akhriska iyo wax qorista laga barto oo kaliya, ee waa in ardayda la siiyo fursad ay kaga sheekaystaan faa'iidada ay waxbarashadu leedahay, waayo-aragnimadooda isku dhaafsadaan, kagana doodaan waxay fasalka iyo buugga ku arkeen.

Danta guud ee waxbarashada laga leeyahay waa in nolosha bulshada Soomaaliyeed kor loogu qaado, sidaa darteed, waxa baraha laga codsanayaa inuu dadka dhex galo oo uu si wanaagsan ula dhaqmo, waayo-aragnimadooda uga faa'idaysto, waxana baraa.

Guusha buuggani waxay ku xidhan tahay wax-wada-qabsiga iyo is af — garashada baraha, ardayda iyo bulshada ka dhaxaysa.

Waxaa lagu daabacay

✓ Wakaaladda Madbacadda Qaranka

MUQDISHO



## **GABAGABO**

---

Dnta buuggan laga leeyahay kuma koobna in wax akhriska iyo wax qorista laga barto oo kaliya, ee waa in ardayda la siiyo fursad ay kaga sheekaystaan faa'iidada ay waxbarashadu leedahay, waayo-aragnimadooda isku dhaafsadaan, kagana doodaan waxay fasalka iyo buugga ku arkeen.

Danta guud ee waxbarashada laga leeyahay waa in nolosha bulshada Soomaaliyeed kor loogu qaado, sidaa darteed, waxa baraha laga codsanayaa inuu dadka dhex galo oo uu si wanaagsan ula dhaqmo, waayo-aragnimadooda uga faa'idaysto, waxana baraa.

Guusha buuggani waxay ku xidhan tahay wax-wada-qabsiga iyo is af — garashada baraha, ardayda iyo bulshada ka dhaxaysa.

Waxaa lagu daabacay

Wakaaladda Madbacadda Qaranka

MUQDISHO